August 29, 2023

Iskaan saar halkan si aad ugu qaadatid xog-ururinta onlayn!

[Geli koodhka QR]

«magaca hore» «magaca dambe» ee
Waalidka ama Mas'uulka
«cinwaanka1»
«cinwaanka2»
«magaalada», «gobolka» «zipka»

Gacaliye Waalid ama Mas'uul «magaca hore»,

Waxaan kugu martiqaadaynaa inaad ka qayb qaadato Xog-ururinta Xanuunada Wadnaha ee lagu Dhashay si loo aqoonsado Natiijooyinka, Baahiyaha, iyo Fayoobaanta CARRUURTA (CHSTRONG-KIDS), xog-ururin lagu baadho baahiyaha aan la daboolin ee carruurta ku dhasha xaaladaha wadnaha iyo waalidkood ama daryeelayaasha. Mashruucan waxa fulinaya Barnaamijka Carruurta iyo Dhallinyarada qaba Baahiyaha Caafimaadka Gaarka ah (CYSHN) ee Waaxda Caafimaadka Minnesota (MDH) iyo Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC).

Ilmahaaga «magaca koowaad ee ilmaha» waxa ay MDH u aqoonsatay in uu yahay qof ku dhashay xaalad wadnaha ah. Waxaan jeclaan lahayn inaad dhammaystirto xog-ururin qaadanaysa 20-daqiiqo oo ku saabsan ilmahaaga iyo caafimaadkooda, tayada noloshooda, iyo helitaanka daryeel. Macluumaadkaaga ayaa naga caawin doona inaan ogaano baahiyaha aan la daboolin ee carruurta ku dhasha xaalad wadne. Si aad wax badan uga ogaato mashruucan, waxaad booqan kartaa <cinwaanka websaydka>

Xog-ururinta waxaa lagu buuxin karaa onlayn ama boostada. Jawaabahaaga midkoodna laguma xidhi doono magacaaga ama magaca ilmahaaga. Magaca ilmahaaga weligii looma sii deyn doono inuu qabo xaalad wadnaha ah. Magacaaga waligiis laguma sii dayn doono inuu buuxiyay xog-ururin ama lagu weydiistay inaad ka qaybgasho. Waxaan ognahay in wakhtigaagu uu qiimo leeyahay. Mahadnaq ahaan, waxaanu kuugu soo dirnay $5 kaadh hadyad ah si aad u ilaaliso inaad dhammaystirtay xog-ururinta iyo inkale. Haddii aad dhammaystirto xog-ururinta, waxaanu kuu soo diri doonaa $20 oo kale oo hadyad ah.

Dalka oo dhan, kumanaan waalidiin ah iyo daryeelayaasha carruurta ku dhashay xaaladaha wadnaha ayaa ka qayb qaadanaya xog-ururintan. Jawaabaha qof kastaa waa noo muhiim waxayna wax ku biirin doonaan waxa aan ka baranno sida xaaladaha wadnaha ay u saameeyaan carruurta. Natiijooyinka ka soo baxa xog-ururinta ayaa caawin kara in la ogaado baahiyaha aan la daboolin ee carruurta ku dhasha xaaladaha wadnaha iyo daryeelayaashooda. Intaa waxaa dheer, macluumaadkan ayaa ka caawin kara qoysaska haysta carruurta qaba xaaladaha wadnaha inay qorsheeyaan mustaqbalka.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan CHSTRONG-KIDS ama haddii aanu si qalad ah kuula soo xidhiidhnay oo aanu ilmahaagu ku dhalan xaalad wadne, fadlan kala xidhiidh Isuduwaha Mashruuca CHSTRONG-KIDS ee [site email] ama [site phone number] si aan u cusboonaysiin karno diiwaanadayada.

Waad ku mahadsan tahay dhammaystirka xog-ururintan muhiimka ah. Si aad ugu buuxiso xog-ururinta onlayn, iskaan saar koodhka QR ee ku yaal geeska midig ee sare ee xarafkan adiga oo furaya appka Kamaradaada ama abka QR Code Reader ee taleefankaaga casriga ah oo ku fiiqaya kamaradaada koodhka QR. Haddii hyperlink u muuqdo, dhagsii si aad u aado xog-ururintaada. Haddii kale taleefankaaga ayaa si toos ah u tagi kara xog-ururinta.

Si daacadnimo leh,

[PI Signature]

[Site PI]
[Site name]

Geli kaarka hadyada halkan

Lifaaqyada:
Xog-ururinta
Kaarka Hadyada
Xaashida Macluumaadka ee Ka-qaybqaataha (*tani waxay sharraxaysaa xuquuqahaaga ka-qaybgale ahaan*